# Asaaska qiimeynta qaranka daryeelka waayeelka

# – Muxuu micnaheeda kula yahay ?




## Nolol qiimo iyo qaayo leh

Waxaa kaloo lagu kordhiyey Qaanuunka adeega bulshada in shaqaalaha ka shaqeeyo daryeelka waayeelka oo dhan in ey howsha u qabtaan si aad ugu noolaato nalol qiimo iyo qaayo leh.

Qaayahaaga ayaa eh kan la tixraacayo. Sidaas daraadeed waxaa muhiim ah in shaqaalaha aad la kulmeysid ey ku weydiiyaan fikradahaaga iyo sida aad damacsan tahey. Daaweyntaada iyo sida laguu daryeelaayo waa in ey noqotaa sidaad dooneyso. Si ay noloshaada u noqoto sida aad u damacsan tahey inaad u noolaato.

## Nolol qiimo iyo qaayo leh waxa ey noqonkartaa tusaalo ahaan:

- Adiga intii suurti gal ah waxaad dooran kartaa marka iyo sida laguu siinaayo kaalmada iyo caawinaada.
- Daryeelka lagu siinaayo waa inuu noqdaa mid goaankiisa, qorsheyntiisa iyo waxkhabadkiisa lagaala tashtey oo la dhigaa sida aad adiga dooneyso. Hadii aad rabto waxaa kulla joogi karo marka la dejinaayo qorshaha qof aad isku dhowdihiin
- Waxaa aad dareemi kartaa in daryeelka lagu siinaayo uu yahey mid taran leh
- In uu yahey lakulanka shaqaalaha mid wacan
- Waxaad dareemeysaa iney shaqaalaha dhageysanyaan fikradaada iyo damacaaga. Inaad si uun ula hadlikartid shaqaalaha inta aad kari karto
- In shaqsigaaga iyo noloshaada la xushmeynaayo.
- Waxaad dareemeysaa sugnaan. Waxaad sugnaan u aragtidna waa mid adiga aad goaan ka gaareysid, laakiin tusaalo ahaan waxaad sugnaan ku dareemi kartaa gurigaaga ama sida ay shaqaalah kuu daryeelaan.
- Waxaa dareemeysa inaad tahey muhiim, waxaa u noolaaneysa sida uu dhaqankaaga iyo diintaada ku falaan.

## Waa maxay asaaskaqiimaynta?

Asaaska qiimeynta waxa ey ka timid sida aan isku qiimeeyno. Sida aan isku khaabilno. Hawsha la qabanaayo waxa ay ka warameysaa sida laysku qiimeeyo uu shaqaalaha u qabaanaayo shaqadiisa

Socialstyrelsen

## Wixii macluumaad oo intaa dheer?

- La xiriir qofka degmaddaada ka shaqeeyo uu xilka ka saaran yahey suaala daryeelka waayeelka
- Weydii shaqaalaha ka shaqeeya daryeelka dadka waayeelka
- Gal Baalkaan www.socialstyrelsen.se/nationellvardegrund Halkaa waxaad ka heleysaa warbixin ku saabsan qimeynta asaaska (värdegrund) oo eh dowlada howsha ey u dirtey maamulka dhexe ee arimaha bulshada. Waxaa kaloo halkan ka heleysaa waxaa uu qaanuunka dhigaayo

Hesho kaaalmada iyo daryeelka aad u baahantahey. Hadii aadan ku qanacsaneyn daryeelka lagu siiyo waxaad kala hadli kartaa qofka degmadaada ka shaqeeyo oo xilka ka saaran yahey suaalaha daryeelka waayeelka. Xilka waxa uu saaran yahey dagmaddaada, si aad ku Qaanuunku muxuu leeyahey?

## Muxuu qoraayaa qaanuunka?

Qaanuunka adeega bulshada (Socialtjänstlagen) waa kan maamula adeega daryeelka waayeelada. Waxaa ku jiro asaaska qiimeynta qaranka (en nationell värdegrund för äldreomsorgen) wixii ka danbeeyey janaayo 2011 ee daryaalka waayeelada ( cutubka 5 qodobla 4aad) Qaanuunkaas wuxuu sheegayaa in shaqada daryeelka waayeelka ey himiladeedu noqoto in dadka waayeelka ah noloshooda ay u noqoto mid qiimo iyo qaayo leh. Sosyal Hizmetler Kanununa yaşlı kişilerin kendilerine meskenlerinde ve kolay ulaşılabilir bir hizmet vasıtasıyla destek olunması ve yardımda bulunulmasının şekli ve zamanını mümkün olduğunca kendilerinin seçebilecekleri ile ilgili yeni bir hüküm daha konmuştur. ( SoL 5. Bölüm 5. Madde ) .

Qaanuunka adeega bulshada (SoL) waxaa kaloo jira goaan cusub oo leh iney dadka waayeelada ilaa intii suurto gal ahay dooran karaan kaalmada iyo caawinaada deegaankooda iyo adeegyada fudud oo la siiyo (cutub 5 qodobkiisa 5 SoL)

**asaaska qiimeynta qaranka daryeelka waayeelka – Muxuu micnaheeda kula yahay ?**
(maqaal lam. 2012-6-20) ka dalban kartaa
Qeybta la dalbado ee maamulka dhexe ee arimaha bulshada
Socialstyrelsens beställningsservice, 120 88 Stockholm
www.socialstyrelsen.se/publikationer
E-post: socialstyrelsen@strd.se
Fax: 08-779 96 67

**Översättning till somaliska**
Äldreomsorgens nationella värdegrund – vad innebär den för dig?
(artikelnr 2012-6-20) kan beställas från
Socialstyrelsens beställningsservice, 120 88 Stockholm
www.socialstyrelsen.se/publikationer
E-post: socialstyrelsen@strd.se
Fax: 08-779 96 67
Publikationen kan också laddas ner på www.socialstyrelsen.se

Socialstyrelsen